

Bronchoscopy (Baaritaanka dhuunta iyo sambabada)

Bronchoscopy

A bronchoscopy is a test to look at your airways and lungs. A long, thin tube is put through your nose or mouth into your lungs. This test is used to check for lung disease or to remove mucous. A small piece of tissue may be removed and studied in the lab. This is called a biopsy.

An adult family member or friend needs to come with you to take you home after the test. It is not safe for you to drive or return home alone.

Arrive on time for your test. Plan on this test taking about 2 hours.

To Prepare

- Talk to your doctor about any medicines you take to thin your blood to prevent clots. You may need to change these medicines or adjust the amount you take before this test.
- Do not eat or drink anything, including water, after midnight before the test.
- If you are to take your medicines the morning of the test, take them with sips of water only.

Baaritaanka bronchoscopy waa baaritaan lagu ogaado dhuunta iyo sambabada.

Tuubo dheer, ayaa la gelinayaa sankaga ama afkaaga si ay u gaarto sambabada. Baaritaanka waxaa loogu talagalay in lagu ogaado xanuunada sambabada ama in lagu soosaaro xab. Waxaa lasoo qaadi karaa xubin yar oo jrika kamid ah kadib waxaa lagu baaraa laabka. Tan waxaa loogu yeeraa biopsy (xab).

Xubnaha qoyska ama saaxiib qof wayn ay ayaa loo baahan yahay inuu kusoo raaco si uu guriga kuugu kaxeeyo baaritaanka kadib. Amaan ma ahan inaad adigu gaari guriga ku aado ama aad kaligaa baxdo.

Imoow xiliga baaritaanka. Qorshaha baaritaankaan waxa uu qaadanayaa 2 saac.

Si aad U diyaargarowdid

- Kala hadal dhakhtarkaaga wixii daawo ah oo aad qaadato si aad dhiigaaga qafiif oga dhigto aadna oga hortagto xinjirowga dhiiga. Waxaad u baahan kartaa inaad badesho daawooyinkaas ama aad wax ka badesho cadadka daawada aad qaadanayso kahor baaritaanka.
- Ha cunin ama cabin waxba, ayna ku jiraan biyo, illaa saqda dhexe habaynka ka horeeya maalinta baaritaanka.
- Haddii ay qasab tahay inaad daawo cunto subaxa baaritaanka, ku cun dhawr kabo oo biyo ah kaliya.

During the Test

- You will wear a hospital gown.
- You sit in a chair or lie on a table during the test.
- An IV (intravenous) is put in a vein in your arm.
- You may be given some medicine to help you relax.
- Small pads are put on your chest to check your heart. For men, chest hair may need to be shaved.
- A blood pressure cuff is put on your arm. Your blood pressure and heart rate are checked often.
- A clip device is put on your finger to check your oxygen level.
- You may be given oxygen to breathe during the test.
- Your mouth and nose are sprayed with numbing medicine.
- The doctor puts the tube into your nose or mouth. You may feel the tube in your throat or the need to cough. You will be able to swallow and breathe.
- Your doctor will be talking to you, but you should not talk during the test. This helps keep you from having a sore throat.
- The doctor removes mucous and a tissue sample if needed.
- The tube is then removed.

After the Test

- The nurse will check you often for about 1 hour after the test.
- Medicines given during the test will make

Inta lagu jiro Baaritaanka

- Waxaad xiranaysaa shuluga isbitaalka.
- Waxaad ku fariinsan doonaa ama seexan doontaa kursi inta uu baaritaanku socdo.
- Tuubada IV (intravenous) ayaa la surayaa xididka gacantaada.
- Waxaa lagu siin karaa daawo kaa caawineysa inaad nasasho dareento.
- Suuf yar ayaa la saarayaa xabadkaaga si loo xubiyo wadnaaga. Nimanka, waxaa laga yabaa in laga xiiro timaha xabadka.
- Qalabka dhiiga lagu cabiro ayaa lagu xiri karaa gacantaada. Waxaa si joogto ah loo hubin doonaa garaaca wadnaha iyo heerka dhiig karka.
- Qalab yar ayaa farta lagu gelin doonaa si loogu ogaado heerka ogsijiinta.
- Waxaa lagu siin karaa ogsijiin si aad u neefsato inta lagu jiro baaritaankaan.
- Afkaaga iyo sankaaaga waxaa lagu buufin doonaa daawo dareenka baabi'isa.
- Dhakhtarka ayaa afkaaga ama sankaaaga gelinaaya tuubo. Waxaad dareemi kartaa tuubada kujirta dhuuntaada waxaad u baahan kartaa inaad qufacdo. Waxaad awoodi doontaa inaad wax laqdo aadna qaadata neef.
- Dhakhtarkaaga ayaa kula hadli doona, laakiin waa inaad hadlin inta baaritaanku socdo. Tani waxay kaa caawinaysaa inaad dareemin dhuun xanuun.
- Dhakhtarka ayaa soo saari kara xuub ama unug baaritaan lagu sameeyo hadii loo baahdo.
- Tuubada ayaa markaas kadib lasoo saarayaa.

Baaritaanka Kadib

- Kalkaalisada ayaa ku eegi doonta hadba 1 saac kadib baaritaanka.
- Daawooyinka la siiyo inta lagu jiro baaritaanka ayaa hurdo kugu ridaaya.

you sleepy. You will need to have an adult family member or friend take you home for your safety.

- In about 2 hours, the numbing medicine wears off and you will be able to eat and drink.
- You may have a sore nose or throat, a hoarse voice or a cough. It is normal to cough up a small amount of blood.
- Test results are sent to your doctor. Your doctor will share the results with you.

Call your doctor if you have:

- A fever over 100.5 degrees F or 38 degrees C
- A sore nose, throat or hoarse voice that lasts more than 2 days
- Other concerns

Call 911 right away if you:

- Have trouble breathing
- Have chest pain
- Have problems swallowing
- Are coughing up large amounts of blood or you have heavy bleeding from your nose or mouth

Talk to your doctor or nurse if you have questions or concerns.

Waa inuu qof wayn oo qoyskaaga ah ama saaxiib uu guriga kuu qaadaa si badqabkaaga loo dhawro.

- Muddo 2 saac ah kadib, daawada dareen la'aanta ayaa baab'aysa waxaadna awoodi doontaa inaad waxna cunto waxna cabto.
- Waxaad isku arki kartaa san ama dhuun xanuun, cod wayn ama qufac. Waa wax iska caadi ah inaad qufacdo dhiig yar.
- Natijada baaritaanka waxaa loo dirayaa dhakhtarkaaga. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegaaya natijada.

Wac dhakhtarkaaga haddii aad qabtid:

- Qandho ka badan 100.5 digrii F ama 38 digrii C
- Darento dhuun xanuun, san xanuun ama cod waawayn oo siijira muddo ka badan 2 maalmood
- Walaacyada kale

Soo wac 911 isla markiiba haddii:

- Neeftu kugu adkaato
- Dareento xabad xanuun
- Dhibaato ku qabto wax laqida
- Aad qufacdo cadad dhiig oo badan ama haddii aad sanko ama afka kasoo dayso dhiig aad u badan

La hadal dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada haddii aad qabtid wax su'aalo ama walaacyo ah.